**DAWLADDA PUNTALND EE SOOMAALIYEED**

**GOLAHA DEEGAANKA DEGMADA QARDHO**

---

# XEER HOOSAADKA GOLAHA DEEGAANKA DEGMADA QARDHO

**QARDHO, LUULYO,2022**

**Tusmada** **Bogga**


**Qodobka 1aad…………………………………………………………… 4aad**
Qeexida xeer hoosaadka golaha shacabka…………………………………4aad
**Qodobka 2aad……………………………………………………………5aad**
Dhaarta xilka……………………………………………………………...5aad
**Qodobka 3aad……………………………………………………………5aad**
Fadhiga 1aad ee Golaha Shacbiga Degmada……………………………… 5aad
**Qodobka 4aad…………………………………………………………….5aad**
Golaha Deegaanka Degmada Qardho………………………………………...5aad
**Qodobka 5aad…………………………………………………………….6aad**
Nabadgelyada xarunta Golaha Deegaanka……………………………………6aad
**Qodobka 6aad…………………………………………………………7aad**
Xilka iyo waajibaadka Golaha Deegaanka ………………………………….7aad
**Qodobka 7aad…………………………………………………………9aad**
Xuquuqda gaar ahaaneed ee xildhibaanka……………………………....9aad
**Qodobka 8aad…………………………………………………………….10aad**
Asbaabaha lagu lumin karo xubinimada golaha deegaanka…………………10aad
**Qodobka 9aad………………………………………………………11aad**
Kal-fadhiyada Golaha shacabka Degmada………………………… 11aad
**Qodobka 10aad…………………………………………………….. 12aad**
Hab-Dhaqanka Xubnaha Golaha Deegaanka......................................................12aad
**Qodobka 11aad..............................................................................13aad**
Xilka Guddoomiyaha Golaha Degaanka.................................................13aad
**Qodobka 12aad.............................................................................................15aad**
Xilka Guddoomiye Ku Xigeenka……………………………………….15aad
**Qodobka 13aad……………………………………………………..15aad**
Shuruudaha Lagu Lumin Karo Xilka Guddoomiyaha Golaha Degaanka……15aad
**Qodobka 14aad………………………………………………………….16aad**
Qaabka Doorashada Madaxda Guddiyada……………………………………16aad
**Qodobka 15aad……………………………………………………17aad**
Guddiga Joogtada Ah…………………………………………………17aad
**Qodobka 16aad………………………………………………………17aad**
Waajibaadka Shaqo Ee Guddiga Joogtada Ah……………………………17aad
**Qodobka 17aad……………………………………………………19aad**
Asbaabaha Lagu Lumin Karo Xubinnimada Guddiga Joogtada Ah………19aad
**Qodobka 18aad………………………………………………………19aad**
Xooghayaha Golaha Deegaanka……………………………………………..19aad
**Qodobka 19aad……………………………………………………20aad**
Shuruudaha Lagu Xulanayo Xoghaya Golaha Deegaanka........................20aad

**Qodobka 20aad.............................................................................................21aad**

Kharashka Golaha Deegaanka……………………………………………21aad

**Qodobka 21aad………………………………………………………..21aad**

Magacaabista Iyo Waajibaadka Gudiga Anshaxa…………………………21aad
**Qodobka 22aad……………………………………………………….22aad**

Wax Ka Bedelidda Iyo Wax Ku Darida Xeer-Hoosaadka..............................22aad

**Qodobka 23aad.........................................................................................22aad**
Dhaqan Gelinta Xeer Hoosaadkan...............................................................22aad

## QODOBKA 1AAD

QEEXIDDA XEER HOOSAADKA GOLAHA SHACABKA DEGAANKA DEGMADA QARDHO.

1.1 sida ku cad qodobka 125aad ee dastuurka DPL, Golaha xeer dejinta degmadu waxay yeelanaysaa xeer-hoosaad u gaar ah.

1.2 Xeerhoosaadka golaha degaanka waa qodobbo qaanuuneed oo lagu nadaamiyey:

b) Qaab dhismeedka golaha degaanka.
t) Habka iyo awoodaha goluhu u hawl gelayo.
j) Habdhaqanka xubnaha iyo hanaan socodsiinta hawlaha golaha degaanka.
x) Hab-raaca shaqo ee guddiyada golaha degaanka.
Xeer nidaamiyaha golaha degaanku waxa uu waafaqsan yahay sharciga LR. 7 ee golaha shacbiga degaanka iyo dastuurka DPL.

**QODOBKA 2AAD**

DHAARTA XILKA

2.1 xildhibaanku waajibaadkiisa shaqo ee loo doortay intuusan bilaabin wuxuu marayaa dhaarta soo socota, waxaana dhaarinaya maxkamada degmada Qardho wuxuuna ku dhaaranayaa; ( Magaca ILAAHAY inaan diinta islaamka ku dhaqmo, dastuurka Puntland xurmaynaayo, qawaaniinta dhawraayo, xilka la ii idmadayna daacadnimo u guto, diinta, dadka iyo dalkana si lilaahi ah ugu adeego).

2.2 xildhibaanka diida dhaarta wuxuu ku waayaya xilka xildhibaanimada golaha shacbiga degmada.

**QODOBKA 3AAD**

FADHIGA KOWAAD EE GOLAHA SHACBIGA DEGMADA

3.1 fadhiga kowaad ee goluhu wuxuu ansaxayaa markii ay joogaan sadex meelood laba meelood (3/2) tirada guud ee Golaha Deegaanka.
3.2 fadhiga kowaad ee golaha deegaanku waxa uu qabsoomi karaa marka ay joogaan sodon maalmood gudahood, kadib markii gudiga doorashooyinka PL ku dhawaqaan natiijada xubnaha Golaha Deegaanka.
3.3 fadhiga kowaad ee goluhu waxa uu magacabayaa gudoomiye ku meel gaar ah xildhibaanka ugu da`ada weyn.
3.4 Gudoomiyaha kumeel gaarka ah wuxuu iclaaminaayaa doorashada Gudooomiyaha Golaha Deegaanka, marka la doorto gudoomiyaha wuxuu la wareegayaa xilka hogaaminta golaha deegaanka.

**QODOBKA 4aad**

GOLAHA DEGAANKA EE DEGMADA QARDHO.

4.1 Golaha degaanka ayaa iska leh awoooda xeer dejinta degmada, waxayna matalaan shacbiga degmada oo dhan sida ku cad sharciga golaha degaamada iyo dastuurka DPL.

4.2 Golaha degaanka degmada Qardho waxaa uu ka kooban yahay 33 xubnood (A grade) oo laga soo doortay deegaan doorashooyinka demada qardho.

4.3 waxaa si rsami ah u dhismay golihii 4aad.

4.4 Mudane kasta markuu gudanayo waajibaadkiisa hawleed waxaa uu matalaa dhamaan dadka degan degmada iyo tuulooyinka hoos yimaada.

4.5 Jiritaanka golaha degaanu wuxuu ku eg yahay muddada ku xusan qodobka 123aad ee dastuurka DPL oo ah muddo 5 sano ah shanta sano ah laga bilaabo xilliga la dhaariyo.

4.6 Xarunta golaha degaanka waa xarunta dowlada hoose ee degmada Qardho.

4.7 Golaha Deegaanku wuxuu shirkiisa ku qabsan karaa meel kasta oo kamid ah Deegaanka Qardho, haddii ay dhacdo sabab loogu shiri kari waayo xarunta degmada.

## QODOBKA 5AAD

### NABADGELYADA XARUNTA GOLAHA DEGAANKA

5.1 Nabadgelyada xarunta golaha degaanka iyo kalfadhiyadooda waxaa u xilsaaran gudoomiyaha golaha deegaanka oo adeegsanaya ciidanka nabadgelyada degmada.

5.2 Ciidanka nabadgelyada degaanka ma geli karaan qolalka shirarka lagu qabanaayo haddaan gudoonku u ogolaan sabab nabadgelyo awgeed,

5.3 Ciidanka nabadgelyada degaanka ma baari karaan xubin kasta oo leh xasaanad xildhibaanimo.

5.4 Ciidanka nabadgelyada waa baari karaan korkiisa qofka caadiga ah aan xasaanada lahayn.

5.5 Lagelidda hubka ee xarunta golaha deegaanka waa ka reebban tahay haddaan ruqsad loo haysan.

5.6 Hadii qof aan ahayn xildhibaan ku xadguba shirka iyo qawaaniintiisa, marka hore gudoomiyaha ayaa siinaya digniin, haddiise uu wax ku qaadan waayo waxaa loo gudbinaya ciidanka nabad-gelyada.

5.7 Haddaanu ahayn shir albaabadu u xiran yihiin waxaa dadweynaha loo ogolyahay gelid iyo dhegaysiga shirka iyaga oo aan wax xuquuq ah ku lahayn dooda, hadalka IWM.

5.8 Haddii inta lagu jiro dooda xildhibaan kasoo cawdo in sharaftiisa wax loo dhimay wuxuu codsan karaa in la dhageysto, shir gudoomiyuhu wuxuu u magacaabi karaa xildhibaankaas Guddi muddo leh, haddii uu arko in arintu mudan tahay, guddigu wuxuu usoo celinaayaa shir gudoonka aragtidiisa, gudoonka golahuna wuxuu ka qaadayaa talaabada ku haboon iyadoo cod iyo dood midna la gelin.

5.9 Haddii xildhibaan ku dhawaaqo waxyaabo aan ku haboonayn shirka , shir gudoonku wuxuu la hadlaayaa mudanaha isaga oo magaciisa kor ugu dhawaaqaya.

5.10 Wixii ka baxsan anshaxa iyo hab-usami socodsiinta hawlaha golaha lana xiriira fal dembiyeed ku qoran xeerka habka ciqaabta soomaaliyeed (XHCS) waxaa loo gudbinayaa hay’adaha garsoorka ee awooda u leh iyadoo loo raacayo nidaamka dastuurka iyo qawaaniinta u dagsan.

## QODOBKA 6AAD

## XILKA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA DEGAANKA

6.1 Waxa ay la xisaabtamaan gudiga fulinta dawladda hoose.

6.2 Diidmada ama ogolaanshaha heshiisyada gudaha iyo dibadda ee ay soo galaan guddiga fulinta degmada, ansixinta ama diidmada wax ka dhimidda iyo wax ku darka xeerarka guddiga fulinta ay hor keenaan golaha.

6.3 Diidmada ama ansixinta iyo wax ka bedelka miisaaniyadda degmada.

6.4 Ansixinta xisaab xirka sannadeedka, Wuxuu golaha degaanka guddiga fulinta degmada xaq ugu leeyahay inuu ku xakameeyo ku dhaqanka wixii qawaaniin ah ee degmada loo go'aanshay.

6.5 In ay soo saaraan go'aan la socon kara sharciga iyo shuruucda kale.

6.6 Waxa ay xaqiijiyaan ururinta canshuuraha iyo ku dhaqanka shuruucda dawlada hoose.

6.7 Goluhu waxay xilka ka qaadi karaan Duqa iyo ku xigeenkiisa marka ay jabiyaan shuruudaha ku xusan qodobka **27aad faqradiisa 4aad** ee sharciga golayaasha degaanka.kaas oo sheegaaya (***Golaha deegaanku waxa ay xilka ka qaadi karaan gudoomiyaha golaha deegaanka ahna duqa degmada iyo kuxigeenkiisa marka ay gudan waayaan waajibaadka loo xil saaray.***)

6.8 Marka uu gudan waayo xilkiisa ama u lunsado hanti qaran, islamarkaasna ay soo jeediyaan saddex meelood oo meel tirade guud ee golaha degaanka, waxaa xilka lagaga qaadayaa sadex meelood oo laba meelood codka tirade guud ee golaha degaanka, Marka uu geeriyoodo, Istiqaalad keeno goluhuna ka aqbalo.

6.9 Haddii ay dhacdo sabab kasta ha ku timaadee xil waayista ku xusan qodobkan, waxaa gudoomiyaha cusub ahna duqa degmada lagu sooo dooranayaa muddo dhan 30 maalmood gudahood, waxaana xilka sii haynaya ku-xigeenkiisa. Haddii xil ka qaadistu wada saameyso gudoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa waxaa xilka sii haynaya xubinta golaha ugu da'ada weyn. Sida ku cad qodobka 32aad farqadiisa 3aad ee xeerka Lr7.

6.10 In ay kormeer iyo dabagal ku sameeyaan habsami u socodka hawlaha D/hoose.

6.11 Waxa ay dejiyaan xeer hoosaadyada iyo awaamiirta lagu fulinaayo hawlaha dawladda hoose ee uu siinaayo xeerka Lr7.

6.12 Arrinkii ay guddiga fulinta degmadu horkeenaan golaha degaanka si goluhu qaynuun ugu rogo waxaa laga rabaa inuu xanbaarsan yahay saxiixa ugu sareeya guddiga fulinta ee ah Duqa degmada.

6.13 Shaqa kasta oo la qabto iyo alaab ama hanti kasta oo lasoo gado ama la iska iibiyo waa in ay ansixiyaan golaha deegaanka.

6.14 Ansixinta waaxyaha dawladda hoose ee ay soo dhisaan gudiga fulinta degmada iyo Ansixinta astaanta D/hoose ee degmada.

6.15 Waxa ay kala diri karaan maamulka degsiimooyinka,tuulooyinka, xaafadaha iyo kaamamka, marka ay cadaato in ay ka bayreen ujeedooyinkii loo dhisay ama ay ka tarjumi waayaan danaha dadka deegaanka.

6.16 Waxa ay ka qeyb qaataan fulinta qorshayaasha dawladda ee heer degmo oo kuwajahan adeegyada bulshada sida waxbarashada asaasiga ah, caafimaadka, xanaanada xoolaha, beeraha, nabadgelyada, biyaha, korontada,isgaarsiinta,ilaalinta deegaanka, nadaafada, hormarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo guud ahaan mashaariicda hormarineed ee heer degmo.

## **QODOBKA 7AAD**

### XUQUUQDA GAAR AHAANEED EE XILDHIBAANKA

7.1 Xildhibaanku waa inuu muujin karaa aqoonsigiisa wakiilnimo markii ay lamahuraan noqoto ID Card.

7.2 Xildhibaanku wuxuu qaadi karaa damaanad shakhsiyadeed iyo maaliyadeed oo macquul ah marka laga reebo danbiyada culus ee xeerka ciqaabta.

7.3 Xildhibaanku ay u caddaato in meel lagaga dhacay sumcaddiisii ama xuquuqdiisii gaar ahaaneeed ee xildhibaanimo, wuxuu dacwad gaar ahaaneed oo tafatiran u gudbinayaa guddoonka. Haddii uu gudoonku u arko inuu sulux ku dhamaan karo xaq ayuu u leeyahay inuu wada

hadalsiiyo, ama toos ayuu golaha u hor dhigi karaa am wuxuu too ugu gudbin karaa hay'adah sharciga nabadgelyada.

7.4 Xildhibaanku waxaa uu xaq u leeyahay gunno lagu saleeyey awoodda dhaqaale ee degmada xiliyada ay socdaan kalfadhiyada golaha.

7.5 Daryeelka dhaqaale ee xubnaha golaha degaanka waxay ku salaysan tahay awoodda dhaqaale ee degmada.

7.6 Xildhibaanku waxa uu xaq u leeyahay guno bileed, guno hawleed, guno xileed, guno fadhi, daryeel caafimaad iyo kor u qaadistiisa aqooneed ee gudaha iyo dibbada haddii loo awoodo.

7.7 Xildhibaanku waxaa uu xaq u yeelanayaa inuu helo hal nuqul oo koobi ah go'aan kasta oo uu goluhu ansixiyo.

## QODOBKA 8AAD

### ASBAABAHA LAGU LUMIN KARO XUBINNIMADA GOLAHA DEGAANKA EE DEGMADA.

Waxaa lagu lumin karaa xubinnimada golaha degaanka asbaabaha soo socda:

8.1 Mudanuhu marka uu shirka ka maqnaado laba kal-fadhi oo is xiga sabab la'aan.

8.2 Jirro hawlgab ah oo ay soo caddeeyeen dhakhaatiir reer Puntland ah ama dhakhaatiir dibadeed oo lagu kalsoon yahay.

8.3 Mudanauhu Marka uu soo gudbiyo istiqaalada golahuna ka aqbalo, Marka uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo la xiriira fal dambiyeed lid ku ah qaranka, Marka uu caadaysto gacan qaadis joogto ah iyo qas golaha ah, isla markaana guddiga anshaxu u soo bandhigo golaha, goluhuna uu xasaanaddii kala noqdo.

8.4 Markii mudanuhu ku xad gudbo diinta islaamka, dastuurka iyo qawaaniinta dalka si bareer ah.

8.5 Markii uu ka qeyb galo shirar ka hor imaanaya siyaasada DPL iyo tan Deegaanka.

8.6 Xil Gudasho la'aan

## QODOBKA 9AAD

## KAL-FADHIYADA GOALAHA SHACBIGA DEGMADA

9.1 Golaha wuxuu yeelanayaa laba kal fadhi oo caadi ah sanadkiiba kuwaas oo ku began 15 January iyo 15 Jully..

9.2 Mudada kal-fadhigu wuxuu noqonayaa 15 cisho hadii ay macquul tahayna 30 cisho wuu gaari karaa wixii ka badana sharcigu ma ogola.

9.3 Golaha waxaa loo soo jeedinayaa wixii mooshin ah ee ka yimaada xubnaha goalaha, gudiga joogtada ah iyo dad weynaha wixii mooshin ah ay ka keensadaan.

9.4 xubnaha golaha waxaa loo soo jeedinayaa ajandaha iyo mudada shirka 10 cisho ka hor wakhtiga qabashada kal-fadhiga iyadoo qoraal ah.

## QODOBKA 10AAD

HAB-DHAQANKA XUBNAHA GOLAHA DEEGAANKA IYO HANAAN U SOCODSIINTA HAWLAHOODA

10.1 xubnaha golaha waxa ay shirka soo galayaan 8:00 ( Sideeda Subaxnimo ) xiliga ka bixitaanka shirku wuxuu noqonayaa wakhtiga uu ku dhawaaqo guddoomiyuhu.
10.2 xubnaha golaha waxa ay saxiixayaan diiwaanka xaadirinta subax kasta inta uu shirku socdo iyo wakhtiga ka bixida shirka labadaba.
10.3 xubnaha golaha waxaa waajib ku ah in ay kasoo qeyb galaan shirka, haddii aanay fadhiga ka hor soo gudbin sabab macquul ah oo ay ku baaqdeen, shir gudoonkuna ogalaado.
10.4 maalin walba intaas shirka la guda gelin waxaa laga bilaabayaa AAYADAHA QUR'AANKA AH
10.5 Mudanaha aan labada saxiix ee soo gelida iyo bixida dhameystirin waxaa ka go'aya guno maalmeedkiisa.
10.6 mudanihii ka maqnaada 5 maalmood ka badan shirka fasax la'aan, waxaa loo gudbinayaa gudiga anshaxa oo talaabo ka qaadaya.
10.7 fasaxa xubnaha waxaa bixin kara Gudoomiyaha Golaha.
10.8 waxaa ka reeban xildhibaanka inta dooda iyo codayntu socoto in uu dhaqa-dhaqaaq sameeyo ama ka baxo goobta shirku ka socdo.
10.9 xubin walba waa in uusan furnaan mobilkiisa/keeda
10.10 waxaa ka reeban cabista sigaarka iyo wixii kale ee dhibaaya xubnaha golaha
10.11 waxaa kaloo ka reeban xildhibaanka buuqa iyo doc ka hadalka xubinta markaa doodaysa.
10.12 Mudanihii ay la kulanto daruuf gaar shakhsiyadeed wuxuu fasax weydiisanayaa gudoomiyaha si gacan taag ah ama qoraal ah haddii aan gudoonku fasaxina talaabo ma qaadi karro.
10.13 Mudanihii ku kaca arimaha ku xusan xarfaha sare ee xeerkan waxaa loo gudbinayaa guddiga anshaxa.

## QODOBKA 11 AAD

XILKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA DEGAANKA

11.1 Guddoomiyaha golaha degaanku waa awoodda ugu saraysa hogaaminta golaha deegaanka ee degmada.

11.2 Wuxuu u xilsaaran yahay furitaanka, xiritaanka iyo hadal qaybinta.

11.3 Wuxuu saxiixaa xeerka iyo go'aamada ka soo baxa golaha.

11.4 Wuxuu magaca golaha ku qaabilaa madaxda booqashada ku timaadda degmada.

11.5 Wuxuu u xilsaaran yahay diyaarinta soo jeedinta ajendayaasha kalfadhiyada.

11.6 Wuxuu awood u leeyahay magacaabidda guddiyo isagoo la kaashanaya ku xigeenkiisa, Wuxuu isugu yeeri karaa golaha degaanka kalfadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.

11.7 Wuxuu u soo jeedin karaa golaha degaanka ee shirka fadhiyada magacaabidda guddi gaar ah oo ka soo talo bixiya arrimaha sasaasiga ah.

11.8 Wuxuu shirka hakin karaa muddo gaaban haddii uu maslaxad u arko.

11.9 Wuxuu bixin karaa talo, digniin, canaan, dhaliil, ama abaalmarin hadba tii uu mutaysto mudanuhu.

11.10 Guddoomiyuhu wuxuu tilmaan shaqo siiyaa madax guddiyeedyada golaha iskuna xiraa hawlahooda, wuxuu kale oo u xil saaran yahay isku xirka golaha degaanka iyo DPL.

11.11 Wuxuu ka qayb galaa shirarka, saxiixyada iyo heshiisyada khuseeya golaha degaanka.

11.12 Wuxuu magcaabi karaa xoghayaha golaha degaanka isaga oo la kaashanaya ku xigeenkiisa.

11.13 Diyaarinta miisaaniyada golaha degaanka kharash garaynta isagoo uu la kaashanayo ku xigeenkiisa iyo xoghayaha dowlada hoose ee degmada.

11.14 Xafiiska guddoomiyahu wuxuu leeyahay xoghayn gaar ah.

11.15 Guddoomiyuhu wuxuu golaha u dalbi karaa garyaqaanno soomaali ah ama ajnabi ah si ay uga kaalmeeyaan dhinaca sharciga.

11.16 Guddoomiyuhu wuxuu kala bedeli karaa guddgia joogtada ah.

11.17 Hadddii guddoomiyuhu u arko mooshin ama biil inaysan waafaqsanayn dastuurka iyo xeer hoosaadka golaha ama meel ka dhac ku yahay madaxda dawladda sida madaxweynaha, ku xigeenkiisa, golaha wasiirada, golaha wakiilada, garsoorka iyo golaha degaanka ee degmada waa uu ka joojin karaa in golaha la hor dhigo ama go'aan laga gaaro.

11.18 Haddii golaha oo ku hawlan xaq u leeyahay arrinta ajendaha ku qoran ay guddoonka soo gaadho arin xaalad deg deg ah ama xildhibaan ha soo jeedsho ama guddiga fulinta ha soo bandhigeen guddoomiyaha ayaa guddi deg deg ah u saarraya si talo deg deg ah uga keenaan.

11.19 Guddoomiyuhu wuxuu xaq u leeyahay kala horumarinta ajendayaasha.

11.20 Guddoomyuhu wuxuu ku wargelinayaa golaha xilliga iyo ajenadaha 15 maalmood kalfadhiga ka hor.

11.21 Guddoomiyuhu wuxuu magacaabaa ama ansixiyaa guddoomiyaha tuulooyinka iyo xogheyntooda.

11.22 Wuxuu joojin karaa mooshin aan waafaqsanayn dastuurka iyo sharciga.

11.23 Hadaan goluhu ogalaan xaq uma laha kala hormarinta ajandayaasha kadib markii uu goluhu ansaxiyo.

## **QODOBKA 12 AAD**

XILKA GUDDOOMIYE KU XIGEENKA

12.1 Markii uu maqnaado guddoomyaha golaha degaanka degmada ama gudan kari waayo xilkiisa, waxaa xilkiisa fulinaaya guddoomiye ku xigeenka.

12.2 Waa la taliyaha gudoomiyaha iyo fuliyaha wixii guddoomiyuhu u wakiisho.

12.3 Haddii ay labaduba maqan yihiin waxa hawsha sii wadaya guddoomiyaha guddiga Anshaxa ee golaha degaanka, saddexduba haddii ay maqan yihiin waxa sii wadaya guddoomiyhaha guddiga Amniga/Nabadgelyada.

## **QODOBKA 13 AAD**

SHURUUDAHA LAGU LUMIN KARO XILKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA DEGAANKA.

13.1 Guddoonka golaha degaanka waxay ku lumin karaan xilka guddoomiyenimada asbaabo ku cad qodobka 15.4 ee sharciga golayaasha degaanka.

13.2 Xil Gudasho la’aan.

13.3 Jabin Dastuurka iyo shuruucda dalka si bareer ah.

13.4 Haddi golahu kalsoonida kala laabto iskuna raacdo sadex meelood laba meelood. (2/3). Si waafaqsan xeerka Lr.7 iyo dastuurka DPL.

## QODOBKA 14 AAD

QAABKA DOORASHADA MADAXDA GUDDIYADA

Qaabka doorasha guddiyada waa:

14.1 Musharax waliba waa inuu taariikh nonoleedkiisa iyo barnaamijkiisa ku hor akhriyaa golaha hortiisa muddo dhan 5 daqiiqo.

14.2 Qaabka cod bixintu waa gacan tag / Qarsoodi.

14.3 Codka waxaa tirinaaya xogheybnta golaha degaanka iyo shaqaalaha

14.4 Haddii mudanaayasha tartamaya ay ka bataan labo musharax codku wuxuu u noqonayaa saddex wareeg labada wareeg oo hore waa 3/2 kan saddexaadna waa hal dheeri.

14.5 Musharixii ku guulaysta labada wareeg oo hore 3/2 ayaa ku guulaystay doorashada madax guddiyeedka, haddii kale nidaamku wuxuu noqonayaa sidaan:

- ✓ Wareegga hore marka la wada galo wareegga labaad waxaa u soo gudbi kara saddexda musharax ee ugu codka badan.
- ✓ Wareegga saddexaad waxaa u soo gudbi karaa labada musharax ee ugu codka badan.
- ✓ Wareegga saddexaad waa hal dheeri.
- ✓ Natiijada doorashada hadba heer ayay maraysaa waxaana ku dhawaaqay guddoonka golaha degaanka.
- ✓ Habka doorashada guddiga joogtada ah kama taggana habkii xubnaha golaha degaanka lagu soo xulay.

## **QODOBKA 15 AAD**

GUDDIGA JOOGTADA AH

Guddiga joogtada ah ee golaha deegaanku waxay ka kooban yihiin 11 xubnood oo kala ah guddoomiye G/xigeenka iyo 9 guddiyeed oo kala ah

1. Madaxa Guddiga Nabadgelyada
2. Madaxa Guddiga Kormeerka iyo Baarista
3. Madaxa Guddiga Dakhliga iyo Maaliyada
4. Madaxa Guddiga Qorsheynta
5. Madaxa Guddiga Arrimaha Bulshada
6. Madaxa Guddiga Hawlaha guud
7. Madaxa Gudiga Shaqada iyo Shaqaalaha
8. Madaxa Gudiga u qareemida iyo hormarinta degmada
9. Madaxa Gudiga arimaha haweenka iyo horumarinta qoyska

## **QODOBKA 16 AAD**

WAAJIBAADKA SHAQO EE GUDDIGA JOOGTADA AH

Waajibaadka shaqo ee guddiga joogtadu waxa uu noqon sedan:

16.1 Socodsiinta hawlaha golaha labada kalfadhi dhexdooda

16.2 Waxa uu ururinayaa xogta iyo dhacdooyinka ka dhaca degmada labada kalfadhi dhexdooda wuxuuna u gudbinayaa warbixin sugan fadhiga golaha

La socodka iyo kormeerka dhamaan habsami u socodka shuruucda degmada ee dawladda hoose iyo hubinta in barnaamijka degmada uu u fulay sidii loogu tala galay

16.3 Guddiga joogtada ahi wuxuu todobaadkiiba yeelanayaa hal shir oo caadi ah

Shirka guddiga joogtada ahi wuxuu ku ansaxayaa 3/2 tirada guddiga marka ay goob joog tahay

16.4 Guddiga joogtadu waxay awood u leeyihiin in ay wacdaan dad ama qof shacabka kamid ah shaqaale hay’adeed ama madaxda iyo masuuliyiinta hayadaha degmada haddii waraysi ama su’aalo ay uga baahdaan arrinta hawlahooda la xiriirta.

16.4 Guddoomiyaha iyo ku xigeenku waa guddoonka guddiga joogtada ah

16.5 Guddiga jootada ahi waxay gaari karaan go’aamo ku meel gaar ah kalfadhiyada dhexdooda oo laga ansixiyo golaha

16.6 Go’aanada guddiga joogtada ahi waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah

Haddii cod is le’egkaado labada jeer waxa cod dheer ah yeelanaya guddoomiyaha golaha degaanka

16.7 Shirka guddiga joogtada ahi waxaa ka qayb gelayaa xoghayaha golaha oo aan cod ku lahayn

16.8 Guddiga joogtada ahi wuxuu xaq uleeyahay ururinta iyo la socodka xaaladda bulsho ee deegaanka

16.9 Wuxuu leeyahay abuuridda qorshayaasha iyo barnaamijyo wax qabad iyo wacyi gelinta dadweynaha

16.10 Wuxuu kormeer hawleed ku leeyahay dhamaan goobaha shaqo ee deegaanka

16.11 Wuxuu leeyahay hubinta iyo dabagalka in wax qabadka degmadu ku salaysan yahay shuruucda golaha degaanka iyo waliba dastuurka DPL

Ka tallo bixinta suggidda amniga degmada.

16.12 Xoojinta xiriirka dadweynaha iyo wax ka qabashada cabashooyinkooda

Ka tallo bixinta iyo wax ka qabashada dhibaatada waxyeelaysa deegaanka iyo dagaalanka xaalufka

16.13 Xoojinta iyo wada shaqaynta golaha deegaanka iyo golaha wakiilada DPL

Ilaalinta dhawrista iyo sharafta golaha deegaanka

## QODOBKA 17 AAD

ASBAABAHA LAGU LUMIN KARO XUBINNIMADA GUDDIGA JOOGTADA AH

17.1 Sharuudaha ku qoran qodobka 45aad ee dastuurka DPL iyo qodobka 12aad ee sharciga golaha deegaanka.
17.2 Xilka gudasho la'aanta
17.3 Markuu ka maqan yahay fasax la'aan shirarka guddiga joogtada ahi labada kalfadhi, Ku xadgudub dastuurka iyo xeerhoosaadka
17.4 Ku xad gudbo dastuurka, sharciyada iyo xeer hoosaadka golaha.
17.5 Haddii maxkamadi ku xukunto go'aan ciqaabeed ee kama dambays ah.

## QODOBKA 18 AAD

XOG-HAYAHA GOLAHA DEEGAANKA

18.1 Xoghayaha Golaha Deegaanku waa madaxa shaqaalaha golaha.
18.2 Wuxuu mas'uul ka yahay ururinta diwangelinta iyo kaydinta hadal qoraalada shirarka golaha deegaanka iyo guddiga joogtada ah.
18.3 Wuxuu mas'uul ka yahay kharashyada golaha deegaanka.
18.4 Shir maalmeed walba marka la furaayo waa in xoghayaha goluhu ku dhawaaqaa xubnaha golaha ee shirka ka maqan, kuwa fasaxa ah iyo tirada fadhida.
18.5 Wuxuu diwaan geliyaa go'amada kal-fadhiyada iyo gudiyada joogtada ah.
18.6 Wuxuu diwan geliyaa hantida golaha.
18.7 Wuxuu tiriyaa cod bixinta golaha.

18.8 Wuxuu ka kaaliyaa Guddoonka hagida shirka.

## QODOBKA 19 AAD

SHURUUDAHA LAGU XULANAYO XOGHAYA GOLAHA DEEGAANKA

18.1 Waa inuu yahay soomaali una dhashay deegaanada Puntland.
18.2 Waa inuu leeyahay asluub wanaagsan
18.3 Waa inuu haystaa shahaado ugu yaraan dugsi sare.
18.4 Waa inuu yaqaan af-soomaaliga kuna hadli karaa luuqadaha carabiga iyo ingiriiska.
18.5 Waa inuu leeyahay waayo aragnimo shaqo ugu yaraan 5 sano.
18.6 Waa inuu yahay qof lagu aamini karro sirta iyo dukumantiyada Golaha.

## QODOBKA 20 AAD

KHARASHKA GOLAHA DEEGAANKA

19.1 Golaha Deegaanku waxaa uu leeyahay kharash maaliyadeed oo qorsheysan marka laga reebo;

b) Daabacaada, qalabka hawl-wadida xafiiska (stationary)
t) Marti qaadyada safarka gudaha iyo dibadda iyo daryeelida dhibaatada culus ee la soo derista xubnaha Golaha Deegaanka.
j) Kharashka socodsiinta hawlaha Guddiyada joogtada ah.

x) Kharashka Golaha Deegaanka waxaa qondaynaaya Xoghayaha Golaha, waxaana saxiixaya Gudoomiyaha Golaha.

## QODOBKA 21AAD

MAGACAABISTA IYO WAAJIBAADKA GUDIGA ANSHAXA

20.1 Gudoomiayaha Golaha Deegaanka wuxuu magacabayaa Gudiga Anshaxa oo ka kooban Guddoomiyaha iyo laba xubnood kuwaas oo masuuliyadooda noqon doonto;

b) in ay anshaxa mariyaan xildhibaankii u gafa sharciga Golayaasha Deegaanada, Degmooyinka iyo xeer-hoosaadyadiisa, hadba iyaga oo ka qaadaya talaabada ku haboon.

t) guddigu sidoo kale waxay anhaxa marinayaan shaqaalaha dawladda hoose inta loo dhisaayo guddi anshax marin oo u gaar ah.

j) Waxay gacan ka geystaan xalinta khilaafaadka ka dhex dhalan kara golaha deegaanka dhexdooda.

x) Haddii Guddoomiyaha iyo Guddoomiye kuxigeenka ay dhacdo in ay shaqada ka maqnadaan waxaa shaqada sii wadaya Guddoomiyaha Guddiga Anshaxa sida uu qabo xeerka Lr7s.

## QODOBKA 22 AAD

WAX KA BEDELIDDA IYO WAX KU DARIDA XEER-HOOSAADKA

21.1 Wax ka bedelidda iyo ku darista xeer-hoosaadkan waxaa iska leh Golaha Shacabka Deegaanka Degmada Qardho.

## QODOBKA 23 AAD

DHAQAN GELINTA XEER HOOSAADKAN

22.1 Mudane kasta waxaa ku waajib ah dhawrista iyo ku dhaqanka xeer hoosaadkan.

22.2 xeer-hoosaadkani wuxuu dhaqan gelayaa marka golaha shacabka degmadu ogolaado gudoomiyuhuna saxiixo.

Dhamaad

Cabdiqaadir Siciid Cabdiraxmaan (Qaal)
Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Ahna Duqa Degmada Qardho.

Saxiixa gudoomiyaha

____________________________________